

TAB IYO XEELAD

ARAAR

Ma qaldame waa ILAAHA awood badanaha sharafta, karaamada, cisiga iyo maamuuska badan, waa khaaliqa abuuray inta nool ee nafi ku jirto iyo inta aan noolayn ee nolosha suurta galisay, bani aadamkuna waa daciif qaldama oo aan sida saxda ah wax u sheegi Karin, dhiganahan yar waxan kusoo tarjumay luqada af-ka soomaaliga ah, kaas oo bilawgiisii hore ahaa luqada af-ka ingiriisida.

Duruufo iyo xaalad jirta darteed waxan damcay in aan af-soomaaliyeeyo, idamka ILLAAHAY qaladaadkiisa idinka ayaa sixi doona waayo idinkaa igana cilmi badan igana fahan badan, sidaas waxan uleeyahay akhristuhu waa aqoon socota oo la garaad iyo garasho toona ma ahan noolaha kale ee aan akhris iyo qoraal toona aqoon.

Idamka ALLE qaladaadku ma badnaan doonaan haday bataana ALLE ayaan ka magan galay dhibta iyo dhiilada ay abuuraan.

TAB IYO XEELAD

Waxan RABI ka rajaynayaa in aad inta wanaagsan kala baxdaan inta kalana aad halkeeda ugaga tagtaan, dhiganahan aan soo tarjumay malahayn wax magac ah ee wuxu ahaa su,aalo la isla yaqaano oo la isku waydiiyo goobaha shaqo, kuwaas oo lagu halgaado codsadayaasha shaqo doonka ah.

CONTENTS

Araar	1
Hordhac	4
Su,aalaha iyo jawaabahooda.....	6
Naftaada iga waran, kuma ayaad tahay ama tuma ayaad tahay?	6
Waa maxay waayo aragnimada aad u leedahay shaqadan?	8
Ma u malaynaysaa in aad shaqadan ku guulaysan doonto?	8
Maxaa ay kaa aaminsanaayeen saaxiibadaadii aadla soo shaqaysay hadii aad soo shaqaysay?	9
Maxaad ka taqaanaa shirkadan ama ururkan?	9
Maxaad samaysay si aad u horumariso naftaada sanadihii kuugu danbeeyay?	10
Maxaad u codsan wayday shaqooyin kale oo aan tan ahayn?	11
Waa maxay sababta aad u rabto in aad u shaqayso shirkadan?	11
Ma taqaanaa qof shaqaalahayaga kamid ah?	12

TAB IYO XEELAD

Mushahar nooc ee ah ayaad u baahantahay in aad ku shaqayso?	13
Ma tahay ciyaaryahan kooxeed?	14
Intee in le'eg ayaad filaysaa in aad noo shaqayn doonto hadii lagu shaqaalaysiiyo?.....	14
Waligaa maku qasbanaatay in aad qof shaqo ka erido sidee se aad u dareentay taas?	14
Maxaad ka aaminsantahay shaqadan?	15
Ma qofkaaga noocana ayaa raba in uu shaqaalahayaga kamid noqdo?	16
Noo sharax sidii aad hanti ugu noqon lahayd ururkan?	16
Maxay kula tahay in aad nagu soo kordhin doonto hadaanu ku shaqaalaysiino?.....	18
Wax iiga sheeg talo aad soo jeedisay oo midho dhashay?	18
Maxaa kaa xanaajiya mararka qaar?	19
Waa maxay awoodaha aad u leedahay qabashada shaqadan?	19
Waa maxay shaqadaada mustaqbalka ama aad ku fikirtaa?	20
Maxaad ka raadinaysaa shaqo?	20
Qof nooc ee ah ayaad diidi lahayd in aad la shaqayso?	21

TAB IYO XEELAD

Kee baa adiga kula muhiimsan shaqada iyo lacagta?	21
Bal wax iiga sheeg dhibaato aad kala kulantay qof maamul ah?	22
Maxaa kugu dhiira galiya in aad shaqadaada u qabato sida ugu fiican?	22
Diyaar ma u tahay in aad shaqayso saacado dheeraada sida maalmaha fasaxyada oo kale?	22
Sideed ku ogaan kartaa in aad ku guulaysatay shaqadan?	23
6.0 Diyaar ma u tahay in aad la guurto shaqada yacni hadii gobol kale lagu bedelo?	23
Ma doonaysaa danaha shirkada inaad ka hor mariso danahaaga gaarka ah?	24
Bal noo sharax qaab maamulkaaga?	25
Noo sheeg waxyaalaha aad ku liidato?	25
Ka hor inta aanad galin goobta waraysiga shaqo waa inaad iska hubisaa dhawrkaan qodob in aad qabatay:	27
Xog ku saabsan qoraaga dhiganaha:	29

TAB IYO XEELAD

HORDHAC

Hadii aad ujeelantahay in aad waxka ogaato su,aalaha waydiiyaha shaqada hayaa uu warsado codsadayaa shaqo doonka ah idamka ILLAHAY dhiganahan yar ayaa waxbadan kaa kaafin doona.

Waxa jira tabo iyo xeelado lagu kala hufo oo lagu kala haadiyo dadyoowga shaqo doonka ah oo afka qalaad ku noqonaysa (interview) waa hab iyo hanaan laga warsado qofka shaqadoonka ah iyadoo looga goleeyahay in la ogaado awoodihiisa shaqo iyo khibradaha dheeriga ah ee uu leeyahay, waxa badanaa la hordhigaa su,aalo cilmi nafsiiyeed iyo su,aalo sir ah oo qofka maankiisa iyo miyirkiisa lagu xado.

Badanaa waxa loo daadiyaa shaxan qofkii habkan waraysi aan waxba ka aqooni uuku heermo oo uu ku halgaadmo, Tabaha iyo xeeladaha qofka loo daadiyo waxa kamida: sida inla waydiiyo mushaharka uuku shaqayn doono taasoo badanaa qofka aan tabahan ka dharagsanayni uuku daadraaco

TAB IYO XEELAD

oo uu uga jawaabo si aan munaasib ku ahayn.

Hadaba akhristaha sharafta iyo karaamada badanoow dhiganahan waxad idamka ilaahay ku baran doontaa Tabaha iyo xeeladaha loogu guulaysto waraysiyada shaqo (interview) waxaadna ku arki doontaa su,aalaha ugu badan ee la is waydiiyo iyo jawaabahooda, idamka ILAAHAY hadii aad dhiganahan yar aad akhrido oo aad dhamaysato kuma hadhi doontid waraysi shaqo oo danbe waxaadna waraysiyada shaqada wajihi doontaa adigoo og su,aalaha lagu waydiin doono iyo jawaabaha macquulka ah ee aad ku jawaabi doonto.

TAB IYO XEELAD

SU,AALAH A IYO JAWAABAHOODA

NAFTAADA IGA WARAN, KUMA AYAAD TAHAY AMA TUMA AYAAD TAHAY?

Su,aasha ugu horaysa ee qofka shaqadoonka ah la waydiiyo waa kuma ayaad tahay ama tuma ayaad tahay, su,aashani waa su,aal la rabo in lagu ogaado cida aad tahay waxaana isha lagu haynayaa inta su,aashaan ka jawaabisteeda aadku gudo jirto sida aad naftaada uga warbixinayso.

Hadaba akhriste si aad su,aashaan uga jawaabto waa inaad maskaxdaada kusii diyaarisaa ereyo kooban oo mug iyo miisaanleh oo aad naftaada ku sharaxayso, ka digtoonow in aad hadalka ku margato yacni aad ku celceliso hal wax.

Waa inaad xooga saartaa kana warbixisaa shaqooyinka aad soo qabatay ee la xidhiidha shaqada aad codsanayso, iskana jir in aad ku hadasho dhawaaq dheer iyo mid gaabanba, waa inaad u hadashaa si dhexe oo deganaan iyo kalsooni u saaxiib ah.

Ugudanbayn waainaadsheegtaaheerkaaga aqooneed adigoo raacinaaya xirfadahaaga kuu gaarka ah.

MAXAAD UGA TAGTAY SHAQADAADII KUUGU DANBAYSAY?

Su,aashani waa mid lagu ogaanayo dabeecadaada iyo shakhsiyadaada qofeed, iska jir in aad ka hadasho dhibaato lagugu sameeyay hana soo hadal qaadin kormeerayaashaadii iyo maamulkaagii shaqadii aad ka shaqayn jirtay marka aad ka waramayso. Uga waran waxa aad uga soo tagtay shaqadaadii adigoo dhoola cadaynaya muujinayana in aanad dhibaato darteed ugaga tagin ee ay tahay qadar ALLE iyo xaalad iska caadi ah oo kugu timid.

Marwalba oo aad six un uga warbixiso shaqadaadii kuugu danbaysay waa marwalba oo aad kasiidurugto shaqadanaad codsanayso, hoostana waa lagaa xariiqayaa iyadoo wajigaaga la akhrisanaayo.

TAB IYO XEELAD

WAA MAXAY WAAYO ARAGNIMADA AAD U LEEDAHAY SHAQADAN?

Ka hadal waxyaabo gaarka kuu ah ee la xidhiidha shaqada aad codsanayso. Hadii aadan lahayn wax waayo aragnimo ah oo shaqadan la xidhiidhana isku day in aad waxuun sheegto sida fahamka guud ee aad ka haysato shaqadan aad codsanayso.

Iska jir in aad been sheegto sida in aad tidhaahdo meel heblaayo ayaan usoo shaqeeyay oo kale, waayo waxa dhici karta qofkan ku waraysanayaa in uu xidhiidh dhaw la leeyahay Meesha aad sheegayso.

MA U MALAYNAYSAA IN AAD SHAQADAN KU GUULAYSAN DOONTO?

Had iyo jeer waa inaad haa ku jawaabtaa oo si kooban aad u sharaxdaa sababta. Sharaxaada wanaagsani waa inaad hadaf dejisay aad ku guulaysan karto, waa inaad si waadax ah oo kalsooni badani ka muuqato uga jawaabtaa su,aashaan adiga oo adeegsanaaya awoodahaaga aad ku hanan karto booskan shaqo.

TAB IYO XEELAD

**MAXAA AY KAA AAMINSANAAYEEN
SAAXIIBADAADII AADLA SOO SHAQAYSAY
HADII AAD SOO SHAQAYSAY?**

Hakuu diyaarsanaadaan odhaah ama labo aad kusoo koobayso jawaabta su,aashan, tusaaleyaalna inaad soo qaadato waa muhiim sida inaad tidhaahdo: “cabdi wuxu dhihi jiray waxad tahay shaqaalihii ugu adkaa ee aan arko.

Jawaabtaada kusoo koob anigu isma qeexi karo laakiin dadka wax xun kama aan maqli jirin badanaana waxaan arki jiray iyagoo i amaanaya.

**MAXAAD KA TAQAANAA SHIRKADAN
AMA URURKAN?**

Su,aashan jawaab uma heli doontid hadii aanad cilmi baadhis kusii samayn meesha aad shaqada ka codsanayso, waxan kugula talin lahaa inta aan la gaadhin waraysiga shaqo in akhristoow aad sii baadho xog ku saabsan meesha aad shaqada ka rabto si aad u noqoto mid og meesha ay ka yimaadeen iyo meesha ay higsanayaan

yacni u socdaan shaqo bixiyayaashu.

Badanaa dadka aqoonta uleh waraysi qaadista shaqo (interview) waxay ku taliyaan in qofka shaqadoonka ahi uu cilmi baadhis ku sameeyo meesha ay shaqada ka codsanayaa.

MAXAAD SAMAYSAY SI AAD U HORU-MARISO NAFTAADA SANADIHII KUUGU DANBEEYAY?

Si jawaabtaada loogu qanco isku day in aad waxqabadyadaada horumarineed ku darto waxla xidhiidha shaqada aad codsanayso, tusaale hadii shaqada aad codsanaysaa ay tahay boos macalinimo isku day in aad sheegto luqadaha aad korodhsatay iyo xirfadaha macalinimo ee aad soo baratay.

Hadii ay shaqo kale tahayna isku day in aad sheegto waxyaabo xirfad ah oo aad baratay lana xidhiidha shaqada aad codsanayso.

MAXAAD U CODSAN WAYDAY SHAQOOYIN KALE OO AAN TAN AHAYN?

Kolkaan waxa la doonayaa in la ogaado kalsoonida aad ku kalsoontahay shaqadaan aad codsanayso, hadii aad sheegto shaqooyin kale oo aad codsatay ama aad codso is leedahay waa marka kaliya ee aad iska ciidaysay shaqadaan aad codsatay.

Ma ahan in aad biyo dhacdo oo aad iska sheegto shaqooyin kale oo aad codso isleedahay ama aad codsatayba, waa inaad muujisaa hanwaynaan aad u hanwayntahay shaqada tan aad codsatay ee lagugu waraysanaayo.

Isku day in aad xooga saarto sida aad shaqadan daacada ugu tahay wax kalana ka fogoow in aad ka waranto.

WAA MAXAY SABABTA AAD U RABTO IN AAD U SHAQAYSO SHIRKADAN?

Ka jawaabista su'aashani waxay qaadan doontaa xoogaa fikir ah waxayna ku xidhantahay hadba cilmi baadhista aad

TAB IYO XEELAD

ku samaysay meesha aad shaqada ka codsanayso. Laakiin waxa muhiim ah in aad marwalba muujiso daacadnimo iyo kalsooni wada socda, waayo kalsoonida iyo daacadnimadu waa shay aad ku kasban karto shaqada aad rabto, isku day hadii aad macluumaad ka hayso shirkada ama goobta aad shaqada ka rabto in aad sheegto waxyaabaha ay ku wanaagsanyihiin iyo faa'iidooyinka ay umada u leeyihiin in aad sheegto.

Iskuna day in ay kaa go,antahay in aad u shaqaysaa oo aad waliba aad ugu hanwayntahay in aad maanta shaqaalahoodii aadla joogto.

MA TAQAANAA QOF SHAQAALAHAYAGA KAMID AH?

Hadii aanad shirkada ama ururka cid ka aqoon haku raagin ka jawaabista su,aashan ee hore uga gudub, hadiise ay jirto cid aad taqaano oo u shaqaysa shirkada ama ururka waa inaad si togan uga warbixisaa oo aad sheegtaa in qofkaas shaqaalaha kamidka

TAB IYO XEELAD

ahi uu mahadiyay ushaqayn tooda.

**MUSHAHAR NOOCEE AH AYAAD U BAAH-
ANTAHAY IN AAD KU SHAQAYSO?**

Ka jawaabista su,aashan isku day intaad ka meeraysan karto inaad ka meeraysato yacni inaad is dhaafiso, waa inaad tidhaahdaa waa su,aal culus oo aanan jawaab loo heli karin waana in aad qofka ku waraysanaaya dib su,aal u waydiisaa tusaale waa in aad tidhaahdaa mushahar intee le'eg ayaad ku bixisaan shaqada noocan ah.

Hadii uu kugu qasbo in aad qiimo sheegto waa inaad tidhaahdaa waxay ku xidhantahay shaqada la qabanaayo waana in aad hore uga gudubtaa.

Akhristaha sharafta iyo karaamada badanoow waxan kaaga digayaa in aad afkaaga ka sheegto qiimo go'an oo lacageed oo aad ku shaqayn karto, laakiin waxa kuu banana in aad tidhaahdo shaqada ayay ku xidhantahay.

TAB IYO XEELAD

MA TAHAY CIYAARYAHAN KOOXEED?

Hadii aad tahay ciyaaryahan kooxeed waa inaad diyaarsataa tusaaleyaal nool oo aad ku sheegayso sababaha togan ee aad u ciyaarto iyo cida aad la ciyaartaba, tusaale waa inaad sheegtaa faa'iidooyinka ciyaarta iyo muhiimada ay nafta uleedahay, kadibna waa inaad jawaabtaada gudo gashaa.

INTEE IN LE'EG AYAAD FILAYSAA IN AAD NOO SHAQAYN DOONTO HADII LAGU SHAQAALAYSIIYO?

Ku jawaab su'aashani in ay adagtahay laakiin aad jeceshahay in aad wakhti dheer u shaqayso, marwalba oo aad cayinto wakhtiga aad u shaqayn karto waa marwalba oo aad cayinto jaaniska guushaada.

WALIGAA MAKU QASBANAATAY IN AAD QOF SHAQO KA ERIDO SIDEE SE AAD U DAREENTAY TAAS?

Dheh tani waa halis. Hana ka dhigin wax fudud ama sinaba ha ugu eekaan in aad jeceshahay in aad dadka caydhiso. Sheeg

mararka qaar hadii laga fursan waayo in qof la eryo in la eryi karo laakiin haku deg-degin taas.

Marwalba maanka ku hay in ayna isku mid ahayn shaqo ka erid iyo dhimista awoodaha shaqo yacni dadka qaar ayaa waxay awood u leeyihiin masuuliyad aad u wayn oo hawlo badan waa in aanad fududaysan oo aad kusoo koobto jawaabtaada hadii laga maarmi waayo way dhici kartaa in aan qof eryo adigoo ku sababaynaya in aad ilaalinayso danta shirkada iyo danta guud ahaan u adeegida mujtamaca.

MAXAAD KA AAMINSANTAHAY SHAQADAN?

Waraystuhu halkan kaama doonayo hadal aad u badan oo farshaxamaysan, laakiin wuxu kaa rabaa falsafada aad ka aaminsantahay shaqada guud ahaan iyo gaar ahaan mida aad soo codsatay.

Bixi jawaab togan oo taabo gal ah isla markaana aad kusoo koobayso muhiimada shaqada adoo muujinaya in shaqo ay

TAB IYO XEELAD

sharaftahay.

**MA QOFKAAGA NOOCANA AYAA RABA IN
UU SHAQAALAHAYAGA KAMID NOQDO?**

Is daji! Haa is daji marwalba oo su,aal qaldan lagu waydiiyo waa marwalba oo fikirkaaga iyo fahamkaaga dad la dhaqan la tijaabinaayo, waxa laga yaabaa dadka qaar in ay aad u xanaaqaan marka la hordhigo su,aalo shakhsiyadooda lagu weeraraayo, laakiin ogoow waa inaad u dhoola cadaaysaa oo aad si degan ugu jawaabtaa waraystaha, adigoo muujinaya kalsooni badan oo aad naftaada ku qabto.

Badanaa dadyowga shaqa taga ahi way ku hadhaan su,aashan iyo midii ahayd mushaharka shaqada waayo waa su,aalo cilmi nafsiiyeed lagu ogaanayo qofka dabeecadiisa iyo waxyaabaha uu xiiseeyo.

**NOO SHARAX SIDII AAD HANTI UGU NO-
QON LAHAYD URURKAN?**

Waa inaad ka fikirtaa su,aashan muujisaana

in aad aad uga warwarsantahay sidii aad u noqon lahayd qof kaalin wayn ku yeesha koboca goobta shaqo. Markasta oo aad si maan gal ah u jawaabtaa waa markasta oo ay sare u kacaan dhibcaha aad ku heli lahayd shaqadan.

Muuji in aad tahay hanti socota oo ay shirkadu u baahantahay, iskana dhig qof qaali ah oo aan la heli Karin, adigoon is amaanayn waa inaad hadana muujisaa dareen aad ku tusayso qiimahaaga qofeed.

MAXAY KULA TAHAY IN AAD NAGU SOO KORDHIN DOONTO HADAANU KU SHAQALAYSIIINO?

Tilmaan talaabooyin muhiim ah oo aad kusoo kordhin karto oo sare u qaadi kara koboca goobta shaqo, ha samayn wax is barbar dhig ah oo ku saabsan goobta aad shaqada karabto iyo goobo kale waayo hadii aad isku daydo in aad samayso isbarbar dhigan waxa laga yaabaa in aad dhaliilo u jeedisoo meesha aad shaqada ka codsanayso adigoon iska warqabin sidaasna hoosta

lagaaga xariiqo.

Sidoo kale waxa laga yaabaa in lagaaga shakiyo in aad u janjeedho shirkad kale.

WAX IIGA SHEEG TALO AAD SOO JEEDI-SAY OO MIDHO DHASHAY?

Hadii ay jiraan talooyin hore oo aad cid ku biirisay way kuu sahlantahay in aad si fudud uga fakato su,aashan laakiin hadii ay kugu cusubtahay u fikir si degan soona jeedi talooyin maangal ah oo la aqbali karo.

MAXAA KAA XANAAJIYA MARARKA QAAR?

Tani waa su,aal dabin ah oo ay adagtahay in aad ka jawaabtaa laakiin u hadal si dhab ah oo togan yacni sheeg waxyaabaha dhabta ah ee kaa xanaajin kara, isticmaal odhaahyo gaagaaban oo muujinaya in aad dadka la heshiis tahay hana ku dheeraan falanqaynteeda waayo waxa laga yaabaa in aad darjiidho.

WAA MAXAY AWOODAHA AAD U LEEDAHAY QABASHADA SHAQADAN?

TAB IYO XEELAD

Waa in aad diyaarsataa jawaabo kooxaysan oo si hufan oo haadsan u tilmaamaya awoodahaaga shaqo tusaale:

Awoodaada maamul, awoodaada xalinta khilaafaadka ama xasaradaha, awoodaada adkaysi in aad ku shaqayso cadaadis iyo celcelin, awoodaada inaad diirada saarto mashaariicdamuhiimkaah, khibradahaaga xirfadeed, dabeecadaada togan ee taabo galka ah.

Intaas oo awoodood markasta oo aad si hufan oo haadsan aad u sheegtaa waa markasta oo dhibcahaaga shaqo helidu ay kor u kac sameeyaan.

WAA MAXAY SHAQADAADA MUSTAQBALKA AMA AAD KU FIKIRTAA?

Ka fogoow in aad sheegto shaqo cayiman xataa ta aad codsanayso iska jir in aad carabaabto, hadii aad sheegto shaqada aad ku tartamaysaa in ay tahay shaqadaada mustaqbalka wad dhimaysaa kalsoonidaada waanad dhaawacaysaa dhibcahaaga shaqo, hadii aad sheegto

TAB IYO XEELAD

shaqo kale waxaad ku beeraysaa shaki ah in aanad ku qanacsanayn shaqadan aad codsanayso, waa inaad tidhaahdaa ma jirto shaqo ii cayiman oo aan mustaqbalka u diyaarsaday laakiin waxan rabaa in aan shaqo walba khibrad ka barto oo aan cilmi iyo aqoon ka korodhsado.

MAXAAD KA RAADINAYSAA SHAQO?

Waa su'aal ay jawaabteedu fududahay waana in aad sheegtaa sababo maangal ah oo kugu kalifay in aad shaqo raadis ahaato, taas waxay kuu fududaynaysaa in aad ka badbaado dabinka lagu qoolay.

QOF NOOCEE AH AYAAD DIIDI LAHAYD IN AAD LA SHAQAYSO?

Waa inaad taxdaa astaamo hagaagsanaanta ka baxsan oo aad u qalafsan, qofkii astaamahaa aad sheegayso oo dhan laga helaa run ahaan waa in aanu noqon qof lala shaqayn karo, tusaale: qof muran badan, qof qaylo badan, qof habsan badan iwm.

KEE BAA ADIGA KULA MUHIIMSAN

SHAQADA IYO LACAGTA?

Ku bilow jawaabtaada in ay marwalba lacagtu muhiimtahay, laakiin lacagtuna ay ku xidhantahay shaqada oo shaqo la,aan in lacag la helaa ay tahay wax aan jirin ama aan suurto gal ahayn.

Waa inaad muujisaa in ay isku xidhanyihiin shaqada iyo lacagtu adoo marwaliba horaysiinaya shaqadu in ay dhasho lacagta.

BAL WAX IIGA SHEEG DHIBAATO AAD KALA KULANTAY QOF MAAMUL AH?

Hayaay! Tani waa dabin aad u wayn oo lagu ogaanayo bal in aad six un uga hadasho maamulkaaga shaqo, hadii aad taxdo ceebaha uu lahaa maamulkaagii hore ama meel aad hore uga soo shaqaysay waxad hoosta xariiq aad u wayn ka saartay shaqadaada waxaadna xamaanta u guratay xagaas iyo shaqo la,aanta.

Waa inaad u hadashaa si degan waana in aad taxdaa tilmaamo togan oo maan-gal ah oo waliba soo jiidasho leh.

TAB IYO XEELAD

MAXAA KUGU DHIIRA GALIYA IN AAD SHAQADAADA U QABATO SIDA UGU FII-CAN?

Waa inaad taxdaa qodobon ayka mid yihiin guul jacayl, dhiiranaan iyo tartan aad kula jirto dhigaaga aad isku shaqada tihiin.

DIYAAR MA U TAHAY IN AAD SHAQAYSO SAACADO DHEERAADA SIDA MAALMAHA FASAXYADA OO KALE?

Su,aashan sida aad uga jawaabaysaa adiga ayay kugu xidhantahay, fadlan daacad noqo oo u jawaab sida ay kula tahay, ha aiyo maya labaduba waa kuu mubaax.

SIDEED KU OGAAN KARTAA IN AAD KU GUULAYSATAY SHAQADAN?

Waa inaad muujisaa kalsooni aad ka qabto in aad guulaysato waana in aad u hadashaa sidii qof guulaystay oo kale, waana in aad taxdaa xirfadahaaga layaabka leh ee aad ku hanan karto booskan shaqo.

Hadii aad u hadasho si dabacsan oo jilicsan waxa laga yaabaa in markale hoosta lagaa

xariiqo oo aad xamaanta u gurato xagaas iyo shaqo la,aan.

6.0 DIYAAR MA U TAHAY IN AAD LA GUUR-TO SHAQADA YACNI HADII GOBOL KALE LAGUU BEDELO?

Iska jir in aad “haa” iska tidhaahdo si aad shaqada u hesho, waa inaad ka hadashaa hadii ay suurto gal tahay sida hadii aadan qoys lahayn oo kale, hadii se aad tahay qof xaasleh waa inaad ka cudur daarataa oo waa inaad sida dhabta ah u hadashaa.

Ma ahan in aad iska sheegto wax aan suurto gal ahayn, waayo waxa laga yaabaa hadii aad hore haa ka tidhaahdo in ay su,aalo kale kasii dhashaan jawaabtaada, oo lagu waydiiyo in aad qoys leedahay iyo in kale, waxaana laga yaabaa adoo xaasleh hadii aad haa iska tidhaahdo in lagu tuhmo in aad shaqada uun aad hada rabto oo afka baarkiisa ay kaa tahay jawaabtaadu.

Laakiin hadii aad sida saxda iyo suurto galka ah u jawaabto ma jirto cid ku qasbaysaa.

TAB IYO XEELAD

**MA DOONAYSAA DANAHA SHIRKADA
INAAD KA HOR MARISO DANAHAAGA
GAARKA AH?**

Tanina waa su,aal kale oo lagu ogaanayo daacadnimadaada, haka werwerin ereyo badan oo aad ku jawaabto ee kaliya haa dheh.

**BAL NOO SHARAX QAAB MAAMULKAA-
GA?**

Iska ilaali astaamaha qaar ka bad-badin ah in aad ku sharaxdo naftaada waayo waxa laga yaabaa in ay shaki abuuraan oo lagu maleeyo in aad shaqada ku dhacsanaysid, marwalba waa inaad u hadasha si quman oo maangal ah su,aalaha qaarna kuma qasbanid oo waad is dhaafin kartaa.

Laakiin waxa aad muhiim u ah jawaabkasta in aad cadaymo raacisaa si warkaagu u noqdo mid maangal ah oo meel mar ah isla markaana la aqbali karo.

NOO SHEEG WAXYAALAH AAD KU LIIDATO?

Su,aashaan waxa ka jawaaba qof nasiib badan, badanaa waa su,aal u baahan fikir iyo deganaan saa'id ah, hadii ay kugu dhacdo in lagu waydiiyo su,aal noocani oo kale ah isku day in aad sheegto waxyaalo bari aad dhibsan jirtay oo aad dhihi jirtay waxaas iyo waxaas ma ahan wax fiican in markii danbe ee aad shaqo gashay in uu wixii kuu noqday shay daruuri ah oo lagu qasbanyahay.

Sidoo kale waxyaalo fiicfiican ayaad sheegi kartaa oo aad ka dhigi kartaa dhaliilahaaga tusaale sida in aad jeceshahay in aanad shaqadaba ka rawaxin, waaxyaalahan afafka qalaad waxa loo yaqaan ama loo garan ogyahay (weaknesses) taas oo afka soomaaliga aan ku tarjunay dhaliil ama God-daloolo.

Intaas waxa inagaga dhan su,aalasha badanaa ay dadka waraystayaasha ahi waydiiyaan codsadayaasha shaqo,

TAB IYO XEELAD

su,aalahan hadii aad si qumanaan iyo yididiilo leh uga jawaabto idamka ILLAAHAY ku khasaari maysid codsigaaga shaqo oo waxad noqon doontaa mid ka gaashaantay oo sii og imtixaanka u ugali doono jawaabihiisa oo idil.

Dhiganahan yar ee aadka u kooban waxan ugu talo galnay in uu kaa caawiyo umada soomaaliyeed wajihida su,aalaha shaqo yacni su,aalaha lagu kala xusho codsadayasha shaqo doonka ah.

Guntii iyo gababadii iyo gunaanadkii akhristaha qiimaha iyo qaayaha badanoow waxan kuusoo jeedin doonaa qodobo dhawr ah oo ay muhiim tahay in aad ku baraarugsanaato wakhtiga aad shaqada ama (interview) ga aad u diyaar garoobayso.

TAB IYO XEELAD

**KA HOR INTA AANAD GALIN GOOBTA
WARAYSIGA SHAQO WAA INAAD ISKA
HUBISAA DHAWRKAAN QODOB IN AAD
QABATAY:**

1. Waa inaad xidhataa dharkaaga kuwa ugu mudan, yacni kuwa aad ugu jeceshahay isla markaana ah kuwa ugu cusub ee ugu soo jiidashada badan.
2. Waa inaad sifiican usii feedhataa u cadayataa isla markaana waa inaad is cadrisaa.
3. Waa inaad iska jirtaa in aad hareeraha eeg-eegto inta aad ku gudo jirto waraysiga shaqo.
4. Waa in aad waraystaha indhihiisa toos u abaarta oo waa in aanad indhahaaga ka leexleexin indhihiisa ama indhaheeda.
5. Waa in aad u fadhiisataa si toosan oo kalsooni badani ka muqato.
6. Hadii aad u fadhiisan waydo qaab toosan waxa laga yaabaa in lagu maleeyo in ay waxkaa qaldanyihiin.

TAB IYO XEELAD

7. Qaab hadalkaagu waa inu ahaataa mid la aqbali karo yacni waa inaad iska jirtaa erayada af-suuqiga ah.
8. Markasta oo aad indhaha ka leexiso waraystaha (interviewer) waa markasta oo uu hoosta kaa xariiqi doono, wuxuuna dareemi doonaa kalsooni daro aad naftaada ku qabto.

ALLE WAYNE ayay mahadi u sugnaatay intaas ayuu dhiganuhu ku dhanyahay, waxan RABI ka rajaynayaa in uu dhiganahan yari ku anfici doono oo aad kala baxday xog kugu filan oo aad ku wajihi karto waraystayaasha shaqo ee ALLE iskeen baday.

Fadlan akhristaha qiimaha, qaayaha iyo sharafta badanoow wixii talo iyo toosin ah iigu soo hagaaji halkan hoose:

XOG KU SAABSAN QORAAGA DHIGANAHA:

Magacaygu waa Xassan waxan ahay arday dhigtajaamacad, waxandiyaariyaykuliyada

TAB IYO XEELAD

maamumla (Public Administration) waxan ahay qoraa aan sidaa u can bixin waloow aan buugaag badan diyaariyay hadana ma jiro buug aan wali soo bandhigay, waxan ahay wiil isku daya curinta suugaanta kala duwan sidoo kale waxan ahay dadkaan aalada Youtubeka waxku soo gudbiya.

TAB IYO XEELAD



hassanaaden122@gmail.com

Ama +252634953354

Facebook Xassan Cali Iid

Youtube: Maxay Channel

Cadayn sababta aan magaca ALLE ugu qoray farta waawayn waa qadarin iyo ixtrimaan aan u hayo khaaliqa awood badanaha waxna dila waxna nooleeya.

ALLE ayaa mahadle, akhriste adigaa karaamo iyo tixgalin leh maadaama aad dhamaysatay dhiganahan yar ee xogta yar ee muhiimka ahi ay ku jirto.

Waxan walal ALLE kaaga baryayaa guul, gobonimo iyo caafimaad waara.

Waxan walal kaala dardaarmayaa in aad ka fogaato xumaanta qabyaalada taas oo ah mida qarankii Soomaaliyeed sidaa u qaribtay ee ukala qoqobtay